

Abaalmarinta Horumarinta Tayada Early Achievers (Guulaysatayasha Ugu Hooreyay)

GUUDMARKA

Quality Improvement (Hagaajinta Tayada, QI) Abaalmarinnada waxaa la siiyaa u-qalmitaanka ka qaybgalayaasha Early Achievers ee haysta Heerka Tayada ee la soo gabagabeeyay oo u adeega carruurta helaysa kabida daryeelka ilmaha ee gobolka. Abaalmarinnada QI waxay aqoonsanaysaa guusha iyo taageeridda barnaamijyada waxbarashada hore si loo hirgeliyo yoolalka horumarinta tayada. Early Start Act (Sharciga Bilowga Hore) (RCW 43.216.085) wuxuu dhigayaa in bixiyayaasha ay tahay inay u adeegaan carruurta helaysa kabka daryeelka ilmaha ee gobolka si ay ugu qalmaan Abaalmarinta QI. Wixii macluumaad dheeraad ah, tag <https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=43.216.085>.



Ujeedada Lacagaha Abaalmarinta

Abaalmarinta QI waxaa loogu talagalay in loo isticmaalo gaaritaanka yoolalka lagu qeexay Quality Improvement Plans (Qorshayaasha Xagaajinta Tayada ee la qoray, QIP) waana in ay la jaanqaadaan Heerarka Tayada Early Achievers. Heerka 2 Abaalmarinta QI ee bixiyayaasha family home child care (daryeelka carruurta guriga qoyska) waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo hawlaha taageeraya waxqabadyada hagaajinta iyo gaaritaanka Heerka Tayada 3.

QIIMAHA ABAALMARINTA HORUMARINTA TAYADA

Abaalmarinta QI waxaa loo qaybiyaa sanad walba iyadoo loo eegayo heerka tayada iyo nooca bixiyaha. Qadarka abaal-marinta waxa lagu muujiyey jaantusyada 1 iyo 2 ee hoose:

Jaantuska 1: Qiimaha Abaalmarinta Hagaajinta Tayada Child Care Center (Xarunta Xannaanada Carruurta)

Heerka 3aad
\$5,000

Heerka 3+
\$5,000

Heerka 4aad
\$7,500

Heerka 5aad
\$9,000

Jaantuska 2: Qiimaha Abaalmarinta Horumarinta Tayada Daryeelka Carruurta ee Guriga Qoyska

Heerka 2aad
\$1,000

Heerka 3aad
\$2,750

Heerka 3+
\$2,750

Heerka 4aad
\$3,000

Heerka 5aad
\$3,250



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

SU'AALAHADA BADANAA LA IS-WEYDIYO



Sideen ugu qalmaaba Abaalmarinta QI?

Si aad xaq ugu yeelato helitaanka Abaalmarinta QI, barnaamijyada waxbarashada hore waa inay:

- Si firfircoon uga qaybqaado Early Achievers oo aad leedahay Heerka Tayada hadda 3 ama ka sareeya. Bixiyayaasha daryeelka carruurta guriga qoyska kuwaas oo ah Heerka Tayada 2 ama ka sareeya ayaa laga yaabaa inay u qalmaan Abaalmarinta QI.
- U adeeg dadka is-diiwaangeliyay oo ugu yaraan 5% wadarta guud ee awoodda shatiga ay ka kooban tahay carruurta aan da'da dugsiga gaarin ee qaata kaalmada daryeelka carruurta ee gobolka ama kuwa kale ee u qalma.

Waa kuwee kabitaannada lagu tiriyo xisaabinta 5%?

Working Connections Child Care (Xidhiidhaha Shaqada ee Xannaanada Ilmaha, WCCC), Seasonal Child Care (Xannaanada Carruurta Xiliyeed, SCC), Homeless Child Care (Daryeelka Ilmaha Hoylaawayaasha ah, HCC), iyo kabida Child Welfare (Daryeelka Ilmaha) ee carruurta aan da'da dugsiga ahayn ayaa dhamaantood lagu daray xisaabinta boqolkiiba. Kabka daryeelka ilmaha ee ay maalgeliso Medicaid, dawladaha hoose, kulliyadaha ama jaamacadaha, dugsiyada degmada, militariga, ama ururada qabaa'ilka ee federaalku aqoonsan yahay ayaa sidoo kale lagu dari karaa xisaabinta. Waa in uu bixiyaha ku soo gudbiyaa adoo iimayl ku diraya QRIS@dcyf.wa.gov.

Haddii xaruntaadu ka heshay lacag-bixinaha kabka ilo aan ahayn WCCC, SCC, HCC, iyo Child Welfare, fadlan iimayl u dir QRIS@dcyf.wa.gov ilaa:

1. Xaqiiji in barnaamijka kabidda uu oggolaaday DCYF.
2. U soo dir dukumeenti rasmi ah oo tafaasiilsan tirada carruurta kabka ah ee bishii loo adeego muddada xisaabinta. Dukumeenti rasmi ah waxa laga yaabaa in lagu xidho bayaanada qaansheegta, diiwaanka imaanshaha, ama warbixinada laga soo saaray xogta rasmiga ah oo ay ku jirto taariikhda dhalashada carruurta. Macluumaadka qaarkood sida magacyada carruurta iyo waalidiinta, ciwaannada, ama lambarrada telefoonku waa inay ahaadaan kuwo sir ah oo aan lagu darin wax dukumeenti ah oo loo diro DCYF.

Maxaan u baahanahay inaan sameeyo si aan u helo Abaalmarinta QI?

Waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso qaansheegyada kabida sidii caadiga ahayd, iyadoo la hubinayo in dhammaan qaansheegyada muddada abaal-marinta lagu soo gudbiyay 30 maalmood gudahooda ee taariikhda heerka tayadaaga. U qalmida si toos ah ayaa loo xisaabin doonaa sanad walba 31 maalmood kadib taariikhda heerka tayada la sii daayay. Kahor intaadan helin abaalmarintaada, waa inaad sidoo kale iska diiwaan gelisaa iibiye Gobolka Washington adiga oo buuxinaya Diiwaangelinta Bixiyaha Gobolka oo dhan iyo foomka W-9, kuwaas oo laga helo at <https://dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider/vendor-number>. Haddii aad u malaynayso inaad hore uga diiwaangashanayd gobolka ama aad u baahan tahay inaad xaqiijiso in macluumaadkaaga biilasha ay cusub tahay si aad uga hortagto in lagu sii hayo abaalmarintaada, waxaad u baahan doontaa inaad la xidhiidho miiska caawinta Diiwaangelinta libiyaha Gobolka oo dhan ee DCYF adoo iimayl ugu diraya dcyf.statewidevendorregistration@dcyf.wa.gov.

Maxaa dhacaya haddii barnaamijkaygu aanu shaqayn sanadka oo dhan?

Bil kasta oo carruurta la adeego waxay ku jirtaa xisaabinta boqolkiiba. Waa in aad xirantahay bisha oo dhan si looga saaro xisaabinta.

Kabka carruurta da'da dugsiga ma lagu xisaabin doonaa 5%?

Kaabista carruurta da'da dugsiga kuma jiraan xisaabinta boqolkiiba.* Da'da-dugsiyeedka waxaa lagu qeexaa inay yihiin carruurta da'doodu tahay 5 iyo ka weyn ee dhigta dugsiga barbaarinta ama fasalka iyo dhammaan carruurta da'doodu tahay 7 ama ka weyn, iyada oo aan loo eegin diiwaangelinta dugsiga.

Ka waran haddii awoodda shatiga ay kala duwan tahay bil ka bil?

Haddii ay jiraan isbeddelo ku yimaadda wadarta awooddaada shatiga, DCYF waxay isticmaali doontaa celceliska awoodda inta lagu jiro bilaha xarunta loogu adeego carruurta.

*. Iyadoo loo marayo wada xaajoodka SEIU 925, labadaba da' dugsiyeedka iyo carruurta aan da'da dugsiga ahayn ee helaya ayaa la tixgaliyaa marka la xisaabinayo 5% shuruudaha kabida ee bixiyayaasha family home child care.

SU'AALAHADA BADANAA LA IS-WEYDIYO (FAQ) (SII SOCDA)

Waxaan dib u soo gudbiyay Heer Tayo la cusboonaysiiyay waxaana helay Heer Tayo 3, laakiin Abaalmarinta QI-daydu way ka hoosaysaa sidii la filayay. Waa maxay sababta aan u heli waayay heerka tayada buuxda ee heerka 3?

Abaalmarinta QI waxaa loo qaybiyaa si sannadle ah. Barnaamijyada waxbarashada hore ee dib u soo gudbiya heer sare horayna u helay Abaalmarinta QI ee sanadka waxay heli doonaan lacag bixinta faraqa u dhexeeya heerarkoodii hore iyo kuwa hadda tayada kadib marka heerkooda tayada la cusboonaysiiyay la sii daayo. Waxaad heli doontaa qaddarka abaalmarin buuxda ee xisaabintaada sannadlaha ah ee soo socota, ilaa iyo inta aad ka soo baxayso shuruudaha u qalmitaanka ee sare. Haddii heerka tayada la cusboonaysiiyay la sii daayo 31 maalmood ama ka yar ka hor qiimayntaada sannadlaha ah, waxaad heli doontaa lacagta buuxda ee heerka tayadaada cusub wakhtiga qiimaynta sannadlaha ah.

Sideen ku ogaan karaa in aan heli doono Abaalmarinta QI iyo inkale?

Bixiyeyaasha leh heerka tayada la soo gabagabeeyay waxay ka heli doonaan iimaylka DCYF qiyaastii 31 maalmood ka dib taariikhda la sii daayay heerka tayada ee ay ku jirto natiijoyinka xisaabinta iyo haddii ay filan karaan iyo in kale inay helaan Abaalmarinta QI.

Ma aanan soo gudbin dhammaan qaansheegyada ka hor inta aan xisaabinta la samayn. Hadda ma soo diri karaa?

Xisaabinta waxay ku salaysan tahay dhammaan qaansheegyada oo waa in ay hesho DCYF ka hor inta aan la go'aamin boqolkiiba 31 maalmood ka dib taariikhda heerka tayada la sii daayay. Marka xisaabinta la dhammeeyo, wax isbeddel ah laguma samayn doono qaansheegad dheeri ah oo ka bilaabmaya xilliga xisaabinta.

Waxaan helay iimayl sheegaya inaan u qalmin Abaalmarinta QI, oo waxaan aaminsanahay inuu jiro khalad. Maxaan sameeyaa?

Xisaabinta DCYF waxay ku salaysan tahay qaansheegyada kabidda ee loo soo gudbiyay DCYF 12 bilood oo buuxa ee ka horreeya taariikhda la sii daayo heerka tayada ka qaybqaataha. Haddii aad soo gudbisay qaansheegyada WCCC, SCC, ama Child Welfare wakhtigan xisaabinta ka hor oo aad aaminsantahay in qaansheegyadan aan lagu darin xisaabintaada boqolkiiba, fadlan la xidhiidh DCYF si aad u hubiso in dhammaan qaansheegyada si sax ah loogu xisaabiyay akoonkaaga.

Bixiyeyaasha qaata lacagaha barnaamijyada kabida ee aan ka ahayn WCCC, SCC, ama Child Welfare waa inay la xiriiiraan DCYF QRIS@dcyf.wa.gov haddii ay aaminsan yihiin inuu jiro qalad xisaabeed.



Goorma ayaan heli doonaa deeqdayda Abaalmarinta QI?

Abaalmarinnada QI waxa la qaybin doonaa ku dhawaad 60 maalmood ka dib taariikhda siideynta heerka tayada xarunta. Boqolkiiba waxa dib loo xisaabiyaa sannad kasta 31 maalmood ka dib sannad-guurada taariikhda heerka tayadaada ee la sii daayay.

Uma qalmin Abaalmarinta QI sanadkan. Ma heli karaa mid sanadka soo socda?

Xaq u yeelashadaadu way isbedeshaa sanadba sanad. Boqolkiiba waxa dib loo xisaabiyaa sannad kasta 31 maalmood ka dib sannad-guurada taariikhda heerka tayadaada ee la sii daayay.

Maxaan ku bixin karaa Abaalmarinta QI?

Abaalmarinta QI waxaa loogu talagalay in loo isticmaalo gaaritaanka yoolalka lagu qeexay Quality Improvement Plans (QIP) ee la ansixiyay waana in ay la jaanqaadaan Heerarka Tayada Early Achievers. Heerka 2 Abaalmarinta QI ee bixiyeyaasha family home child care waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo hawlaha taageeraya gaaritaanka heerka tayada 3. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalka la ogol yahay ee lacagaha abaalmarinaha ee Tilmaamaha Hawlgelinta Early Achievers ee laga heli karo onlayn at www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/ea/OperatingGuidelines.pdf. Haddii aadan hubin kharash, waxaad ku soo diri kartaa sanduuqa QRIS ee sanduuqa QRIS@dcyf.wa.gov.

Shatigayga si ku meel gaadh ah ayaa loo xidhay wakhtiga qiimaynta sannadlaha ah, laakiin tan iyo markaas dib ayaan u furay. DCYF ma dib u xisaabin doontaa?

Haddii aad hesho ogeysiis ah inaad helin qiimaynta Abaalmarinta QI sababtoo ah shatigaagu wuu xidhnaa oo aad dib u furtay, fadlan u soo dir sanduuqa QRIS ee QRIS@dcyf.wa.gov.

Barnaamijkaygu si joogto ah ayuu u xidhan yahay. Maxaan ku sameeyaa Abaalmarinta QI ee hadhay?

Barnaamijyada sida joogtada ah u xidhay shatiga ganacsiga looma tixgalinayo bixiye shati haysta ama ka qaybgalayaasha Early Achievers (Guulaysatayasha Ugu Hooreyay) waana inay ku soo celiyaan dhammaan lacagaha aan la bixin DCYF marka la xidho shatiga joogtada ah. Fadlan iimayl ku soo dir sanduuqa QRIS ee QRIS@dcyf.wa.gov si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah.

SAMBOLKA 5% XISAABINTA

Sambolka Xisaabinta Child Care Center (Xarunta Daryeelka Ilmaha)

Jadwalka soo socdaa waxa ay muujinayaan waxa xisaabintani u ekaan karto child care center ee caadiga ah. Tusaalahan, xaruntu waxay leedahay awood shati leh oo ah 25 waxayna u adeegtaa kaliya carruurta aan da'da dugsiga gaarin jadwal dugsiyeedka sagaal-bilood ah. Jadwalka kowaad wuxuu muujinayaa muddada abaal-marinta ee 12-bilood ah oo ku salaysan heerka tayada la sii daayay ee Agoosto 15, 2016.

Bisha Adeegga	Tirada Carruurta ee Kaalmada loo Adeegay iyada oo ku saleysan qaansheegyada la soo gudbiyay
Agoosto 2015	Xiran
Sebteembar 2015	5
Oktoobar 2015	5
Noofeembar 2015	4
Deseembar 2015	4
Janaayo 2016	0
Febraayo 2016	3
Maarso 2016	4
Abril 2016	4
Maayo 2016	5
Juun 2016	Xiran
Julaay 2016	Xiran
Wadarta Sannadlaha ah	34

Si loo go'aamiyo boqolleyda xarunta, wadarta sannadlaha ah (34) waxaa loo qaybiyaa tirada bilaha ay xaruntu u adeegto carruurta (9) si ay u helaan celceliska tirada carruurta helaysa kabida bil kasta (3.77). Celceliska tirada carruurta qaata kabida waxa loo qaybiyaa celceliska guud ee awoodda shatiga ee xarunta oo ah 25 boqolkiiba 15%, sida lagu muujiyey shaxda labaad ee hoose:

Tirada guud ee carruurta ku jirta kabida ee la adeegay 12 kii bilood ee u dambeeyay	Tirada bilood ee furmay 12 bilood ee hore	Celceliska tirada la bixiyo bishii (34/9)	Celceliska wadarta guud ee awoodda shatiga	Boqolkiiba carruurta ku jirta kabida (3.77/25)
34	9	3.77	25	15%

Iyada oo lagu saleynayo boqolkiiba ugu dambeeya, oo ka sarreeya ugu yaraan 5%, xaruntan waxay u qalantaa Abaalmarinta QI.

Sambolka Xisaabinta Family Home Child Care (Daryeelka Carruurta Guriga Qoyska)

Jadwalka soo socdaa waxa uu tusinayaa tirada carruurta uu bishii u adeego bixiyaha family home child care ee u adeegaya qoysaska haysta shaqo xilliyeedka. Tusaalahan, bixiyaha waxa uu haystaa wadarta awooda shatiga leh ee lix caruur ah laakiin waxa uu u adeegaa carruurta oo kaliya inta lagu jiro qayb ka mid ah sanadka. Bixiyaha waa in uu xidhnaadaa bisha oo dhan si bisha looga saaro xisaabinta.

Bisha Adeegga	Tirada Carruurta ee Kaalmada loo Adeegay iyada oo ku saleysan qaansheegyada la soo gudbiyay
Agoosto 2015	1
Sebteembar 2015	2
Oktoobar 2015	2
Noofeembar 2015	2
Deseembar 2015	Xiran
Janaayo 2016	Xiran
Febraayo 2016	Xiran
Maarso 2016	Xiran
Abril 2016	0
Maayo 2016	1
Juun 2016	1
Julaay 2016	1
Wadarta Sannadlaha ah	10

Tirada carruurta ku jirta kaalmada bixiyaha u adeego bil kasta ayaa lagu daraa wadar ahaan 10. Wadartan ayaa markaa loo qaybiyaa tirada bilaha uu bixiyaha u adeegay carruurta (8) si loo helo celceliska tirada carruurta ee kaalmada la siinayo bil kasta (1.25). Celceliska tirada carruurta qaata kabida waxa loo qaybiyaa celceliska guud ee awoodda shatiga ee xarunta oo ah 6 boqolkiiba 20.8%, sida lagu muujiyey shaxda labaad ee hoose:

Tirada guud ee carruurta ku jirta kabida ee la adeegay 12 kii bilood ee u dambeeyay	Tirada bilood ee furmay 12 bilood ee hore	Celceliska tirada la bixiyo bishii (10/8)	Celceliska wadarta guud ee awoodda shatiga	Boqolkiiba carruurta ku jirta kabida (1.25/6)
10	8	1.25	6	20.8%

Iyada oo lagu saleynayo boqolkiiba ugu dambeeya, oo ka sarreeya ugu yaraan 5%, xaruntan waxay u qalantaa Abaalmarinta QI.